IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

الرسمية الجريدة

Sannadka 14aad Muqdisho 1da Feberaayo 1986 L. 2

JAMHUURIYADDA DIMUQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطيه

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar walba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo Qiimaha qortitaanku F. R halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## KOOBNIIN

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 4 ee 13 Jen. 1986, Oggolaansho Meel-marin Heshiis damaanadeed oo Bankiga Horumarinta Soomaaliyeed iyo Bankiga Horumarinta Islaamka. Bog; 56

SHARCI L. 5 ee 13 Jen. 1986, Oggolaansho Xisaab-Xirka Miisaaniyadda 1984. » 57

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 1 ee 12 Jen. 1986, Meel-marin Heshiiska oo dhexmaray Bankiga Horu/ta Soomaayeed iyo Bankiga Horu/ta Islaamka. » 60

DECREE.; 1 on 12 Jan. 1986, Instrument of ratification. » 6

XEER DAWLADDA HOOSE MUQ. L. 1 ee 26 Agos. 1985, Cad dhul Dawladeed oo ku yaal Muqdisho, KM. 12, Maddada Afgooye. » 62

QAYBTA SAD/XAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

DAWLADDA HOOSE MUQ. 19.9.85, Naado Dhul J.le Cabaas Suufi Maxamed L.30 » 64

DAWLADDA HOOSE MUQ. 19.9.85, Naado Dhul J.le Cabdi Jaamac Ciise L. 31 » 65

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 19.1.86, Lumid Jeeg. War. L. 0000679 ku qoran Cawil Maxamed Faarax L. 32 » 66

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 20.1.86, Lumid Jeeg War. L. 537978 ku qoran Axmed Ibraahim Xayd L. 33 » 67

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 20.1.86, Lumid Jeeg War. L. 537979 ku goran Axmed Ibraahim Xayd L. 34 » 68

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 26.12.85, Lumid Buug Kayd L. 16932 ku qoran Maxamed Cali Maxamed L. 35 » 69

MAXKAMADDA G. HARGEYSA, 5.1.85, Lumid Jeeg War. L. B.0207283 ku qoran Cali Aw-Xirsi Kooshin L. 36 » 70

MAXKAMADDA G. HARGEYSA, 23.12.85, Lumid 3 Jeeg War. ku qoran CaliCabdullaahi Maxamed L. 38 » 71

MAXKAMADDA G. HARGEYSA, 25.12.85, Lumid Jeeg War. L. 208741 ku qoran Xalwo Giire Saciid L. 39 » 73

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 20.1.86, Lumid Jeeg War. L. 0354390 ku qoran Kayd Ismaaciil Diiriye L. 40 » 74

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 27.1.86, Lumid Jeeg War. L. 0469060 ku qoran Maxamed Cabdulle Buuwe L. 41 » 75

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 27.1.86, Lumid Jeeg War. L. 0467643 ku qoran Cabdiraxmaan Weheliye Geedi L. 42 » 76

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 27.1.86, Lumid Jeeg War. L. 0467644 ku qoran Cabdiraxmaan Weheliye Geedi L. 43 » 77

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 27.1.86, Lumid Jeeg War. L. 0467645 ku qoran Cabdiraxmaan Weheliye Geedi L. 44 » 78

MAXKAMADDA G. HARGEYSA, 8.1.86, Lumid 2 Jeeg War. kuna qoran Xasan Rooble Nuur L. 45 » 79

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 16.1.86, Lumid Jeeg War. L. 0234058 ku qoran Axmed Colujoog Nuur L. 46 » 81

MAXKAMADDA G. HARGEYSA, 23.1.86, Lumid Jeeg War. L. 040047 ku qoran Ismaaciil Maxamed Xirsi L. 47 » 82

YEERID — SOMALI BOTTLING COMPANY. » 84

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

Sharci lambar 4, taariikh 12 Jan. 1986: Oggolaansho meel-marinta Heshiis damaanadeed oo dhexmaray Bankiga Horumarinta Soomaaliyeed iyo Bankiga Horumarinta Islaamka.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYO: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda.

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meel-marinta Heshiiska dammaanadeed oo dhexmaray Bankiga Horumarinta Soomaaliyeed iyo Bankiga Horumarinta Islaamka.

2. Heshiiskan waxaa lagu kala saxiixday magaalada Jeddah ee Dalka Sacuudi Caraabiya taariikhdu markey ahayd 10.2.1985.

3. Heshiiskan wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan Heshiiska ku tilmaaman Qodobka 1aad ee Sharcigan waxaa dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Heshiiska.

Qod. 3aad

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaa awood loo siiyey inuu meel-mariyo Heshiiska Sharcigan ku tilmaaman.

Qod. 4aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 12 Jan. 1986

MADAXWEYNAHA JDS

Sharci lambar 5, taariikh 13 Jan. 1986: Oggolaanshaha Xisaab-Xirka miisaaniyadda 1984.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda.

Qod. 1aad

Waxaa la oggolaaday Xisaab-Xirka Miisaaniyadda 1984 oo ah sida ku tifaftiran lifaaqa 1aad.

Qod. 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 13 Jan. 1986

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Isugeynta Kharashka Guud ee ee Xisaab xirka Miisaaniyadda 1984 | | Sh.So. | 7.643.405.225.85 |
| 2. | Kharashka Caadiga ee Hantidhawrka Diiwaangeliyey | | » | 5.547.610.395.83 |
| 3. | Ku dar Wasaaradda aan Hantidhawrku Diiwaan gelin | | » | 4.809.040.90 |
| 4. | Kharashka Mashaariicda Hantidhawrku Diiwaa ngeliyey | | » | 611.153.914.12 |
| 4. | Ku dar Waaranada aan Hantidhawrku Diiwaangelin ee Mashaariicda | | » | 50.306.379.88 |
| 6. | Ku dar Curaarta Hawl gab | | » | 1.839.552.12 |
| 7. | » » » Iskaa Wax u Qabso | | » | 66.505.176.12 |
| 8. | » » » Kale | | » | 1.051.865.376.23 |
| 9. | » » » Amaah | | » | 2.047.930.26 |
| 10. | » » » Xawaalad | | » | 86.535.654.85 |
| 11. | » » » Horumarin | | » | 7.861.812.65 |
| 12. | » » » Kharashka D/Hoose | 7.643.405.225.85 | » | 7.634.405.225.85 |

DAKHLIGA GUUD EE SANNADKA 1984

| | QIYAASTA MISAANIYADDA | DAKHLIGA DHABTA AH | DHAAFID | DHINAANSHO |
|---|---|---|---|---|
| 1. Dawladda Dhexe | 6.491.817.017.00 | 4.343.102.780.41 | 633.081.774.99 | 2.781.796.011.85 |
| 2. Dawladda Hoose | 222.187.000.00 | 208.824.564.91 | 4.390.753.89 | 17.753.188.98 |
| | 6.714.004.017.00 | 4.551.927.345.32 | 637.472.528.88 | 2.799.549.200.56 |
| 3. Dakhliga Miiska baxsan | — | 1.243.090.358.88 | — | — |
| 4. Xaasilka 31.12.83 | — | 36.841.976.54 | — | — |
| | 6.714.004.017.00 | 5.831.859.680.74 | 637.472.528.88 | 2.799.549.200.56 |

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 1, ee taariikh 12 Jan. 1986: Meelmarinta Heshiiska dammaanadeed oo dhexmaray Bangiga Horumarinta Soomaaliyeed iyo Bankiga Horumarinta Islaamka.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67aad, faqradda 5aad iyo Qod. 82aad, faqradda 4aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23ka Disember 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka;

MARKUU ARKAY : Sharciga tirsigiisu yahay 4 ee 12.1.86 oo Golaha Shacbigu uu ku oggolaaday Heshiiska ujeeddada ku tilmaaman;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Heshiiskan la meelmariyo;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meelmariyey Heshiiska dammaanadeed oo dhexmaray Bankiga Horumarinta Soomaaliyeed iyo Bankiga Horumarinta Islaamka oo lagu kala saxiixday magaalada Jeddah ee Dalka Boqortooyada Sacuudiga taariikhdu markey ahayd 10.2.1985.

Qod. 2aad

Heshiiskani wuxuu Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya ku yeelanayaa astaan sharci ah.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Xamhuuriyadda.

Muqdisho, 12 Jan. 1986

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

DECREE No. 1, of 12 Jan. 1986: Instrument of ratification.

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: The Article 67, para 5 and Article 82, para 4 of the Constitution of the Somali Democratic Republic;

HAVING SEEN: The Law No. 49 of 23 December 1984;

HAVING SEEN : The Law No. 4 of 12.1.1986 on the pase of which the People's Assembly has approved the Agreement specified in this Decree;

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agreement;

HEREBY PROMULGATES

the following Decree;

Article I

The Guarantee Agreement between the Government of the Democratic Republic of Somalia and the Islamic Devolopment Bank signed in Jeddah on 10th February 1985, is hereby ratified.

Article 2

This Agreement shall have a force of Law in the Territory of Somali Democratic Republic.

Article 3

This Decree shall come into force upon signature by the President of Somali Democratic Republic and shall be published in Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 12.1.1986

THE PRESIDENT OF S.D.R.
(Mohamed Siad Barre)

XEER DAWLADDA HOOSE MUQ. L. 1 ee 26 Agosto 1985: Cad dhul Dowladeed oo ku yaal Muqdisho-KM. 12 ee Waddada Afgooye oo la siiyey WEYDOW AXMED WARSAME, kuna fadhiya mq. 72.000/=.

DUQA MAGAALADA MUQDISHO

ISAGOO ARKAY: Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqoraadiga Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lamb. 41 soona baxay 13kii Settembre 1973 oo ku saabsan oggolaanshaha dhulka dhismaha;

ISAGOO ARKAY: Xeer lamb. 6 soona baxay 9 Jennaayo 1967 oo la xiriira qiimaha dhul bixinta;

ISAGOO ARKAY: : Arjigii codsiga ahaa ee uu keensaday WEYDOW AXMED WARSAME, taariikhdu markay ahayd 1 Dic. 1964, kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed oo ku yaal (Muqdisho) KM. 12, Waddada Afgooye;

ISAGOO AQOONSADAY: Coddeynta dhulka, kuna saabsan cad dhul Dowladeed ah oo ku weydiistay Jaallahaas ogeysiis ahaanna loogu Faafiyey looxa Dawladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGOO ARKAY: Naqshadda lamb. yahay 181 kuna saabsan dhismo naqshadeed oo ay horey u aqoonsadeen Guddiga D/Hoose ee Xamar - Qaybta M/-dhulka Rasmiga - Fadhigii 4aad ee 23.4.1984 kuna saabsan Guryo;

ISAGOO ARKAY: Bolleetada lamb. yahay 89798 ee 2.6.1984, kana soo baxday Xafiiska D/Hoose ee Xamar, Qaybta lacag Qabashada, taas oo caddeyneyso in WEYDOW AXMED WARSAME, uu bixiyey lacag dhan Sh.So. 216.000/= kuna saabsan qiima-

ha dhulka oo dhismaha loo siiyey, kuna fadhiya mq. 72.000/=;

ISAGOO AQOONSAN: Dhulka la weydiistay oo ku fadhiya mq. 72.000/= tilmaan cadna laga siiyey WEYDOW AXMED WARSAME, sida ku cad warqadda siismada dhulka ee D/HOOSE (VERBALE DI CONSEGNA) taariikhdeeduna ahayd 3 Giugno 1984;

IYADOO SALDHIG LOOGA DHIGAY: Qod. 20 iyo 24 ee Sharciga lamb. 10 soona baxay 17 Dic. 1980 kuna saabsan maamulka dhulka dhismaha ee GOBOLKA BENAADIR.;

WUXUU SOO SAARAYAA

A M A R K A

SOO SOCDA:-

Waxaa cad dhul Dowladeed ah la siiyey WEYDOW AXMED WARSAME oo ku yaal KM. 12 ee WADDADA AFGOOYE kuna fadhiya mq. 72.000.-

Muqdisho, 26 Aug. 1985

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka lamb. 1 Bogga lamb. 22.
Muqdisho, 31 Dic. 1985.-

HANTIDHAWRAHA GUUD
W.S.DR. XUSEEN CABDULLE CALI.-

DUQA MAGAALADA MUQDISHO
W.S. G/le Sare aXsan Abshir Faarax

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR
Waaxda Dhulka Rasmiga ah

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Cabdi Jaamac Ciise uu soo qortay Arji una soo qortay Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 28.3.1985 uu ku soo weydiistay gabal dhul Dawladeed oo ku yaal Muqdisho Degmada Wadajir Qaabkiisu yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 50X100 kuna fadhiya mq. 5000/=.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Dad

Koofur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul G.L. 110

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon maalmood, laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 19 Sep. 1985

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DHULKA D/H.
— Dr.Xasan Maxamed Sabriye —

L. 31

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR
Waaxda Dhulka Rasmiga ah

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Cabaas Suufi Maxamed uu soo qortay Arji una soo qortay Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 3.4.1985 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed oo ku yaal Muqdisho Degmada Wadajir Qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 50X100 kuna fadhiya mq. 5000/=.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Dad

Koofur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Dhul G.L. 111

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon maalmood, laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 19 Sep. 1985

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DHULKA D/H.
— Dr.Xasan Maxamed Sabriye —

L. 30

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: In Jeeg Wareega dhumay lambarkiisuna ahaa 0000679 lagana soo saaray Bangiga Dhexe ee Soomaaliyeed kuna qoran lacag dhan Sh.So. 433.583.80/= uuna iska lahaa Jaalle Cawil Maxamed Faarax, sida ku cad warqadda Lam. HB/10142 ee Bangiga Dhexe ee Soomaaliyeed.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Wareega Lam. 0000679 ee ku qoran Cawil Maxamed Faarax ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 433.583.80/=.

WUXUU FASAXAYAA

Bangiga Dhexe ee Soomaaliyeed in uu Siiyo Jaalle Cawil Maxamed Faarax oo ah Agaasimaha Guud ee Agaasinka Istaatistikadda Wasaaradda Qorshaynta Qaranka Lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 433.583.80/ oo ku qoran Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S., haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 19.1.86

GUDDOOMIYAHA MGB
— Dr. Cabdi Salaad Shangole —

L. 32

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In J/Wareega dhumay uu lambarkiisu ahaa 537978 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna qoran lacag dhan Sh.So. 20.000/= uu iska lahaa Axmed Ibraahim Xayd sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 1196 taariikhdeeduna tahay 20.1.86 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2 ee 9.9.65

WUXUU FARAYAA

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/Wareega Lam. 537978 ee ku qoran Axmed Ibraahim Xayd ayna ku jirto Sh.So. 20.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Burco u bedesho Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 20.1.86

GARSOORAHA MGB
— Dr. Cabdi Salaad Shangole —

L. 33

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In J/Wareega dhumay uu lambarkiisu ahaa 537979 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Burco lakuna qoran lacag dhan Sh.So. 20.000/= uu iska lahaa Axmed Ibraahim Xayd sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 1196 taariikhdeeduna tahay 20.1.86 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaayeed Laanta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam.2 ee 9.9.65.

WUXUU FARAYAA

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg Wareegga Lam. 537979 ee ku qoran Axmed Ibraahim Xayd ayna ku jirto Sh.So. 20.000/=.

WUXUU FARAYAA

In aBnkiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Burco u bedesho Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daa'baco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 20.1.86

GARSOORAHA MGB
— Dr. Cabdi Salaad Shangole —

L. 34

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Codsiga dusha ku qoran;

HADDUU TIXGELIYAY: In uu dhumay Buug Kayd Lam. 16932 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 2.028.61/= kuna qoran magaca Maxamed Cali Maxamed sida ku cad warqadda lam. 005071 taariikh 19.12.85 kana soo baxday Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WUXUU XEERIYEY

In la baabiyo lana qiimo tiro (Ammortamento) Buug Kayd Lam. 16932 lagana sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 2.028,61/=, magaca Maxamed Cali Maxamed.

WAXAA LA FASAXAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in uu siiyo Jaalle Maxamed Cali Maxamed lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 2.028,61/= ee ku qoran Buugga Kaydka ee kor ku tilmaaman, kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horraysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 26.12.85

GUDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdi Salaad Shangolle

L. 35

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA

TIRSI/MGH/1/86

UJEEDDO: - Digireeto Cusbooneysiin Jeegga Wareegee lumay Lambarkiisu yahay B 0207283 ee Lacagtiisu dhan tahay 50,000/= Shillin ee taariikhdiisu tahay 27.11.85, kuna qoran Xasan Aadan Shirre.

Guddoomiyaha Max. G. W/Galbeed ee Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay CALI AW XIRSI KOOSHIN ee ku Taariikhaysan 18.12.85 uuna ku Codsanaayo in loo Cusbooneysiiyo Jeegga Wareega ee Lumay Lambarkiisu kor ku qoran yahay;

MARKUU ARKAY: Caddaynta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa, Lambarkeedu yahay 1766 ee Taariikhdeedu tahay 24.12.85, laguna soo Caddeeyey in laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo aKydka Laanta Hargeysa, loona sameeyey Xasan Aadan Shirre, Lacagtiisuna dhan tahay 50,000/oo Shillin, lana sameeyey Taariikhdu markay ahayd 27.11.85;

MARKUU ARKAY: Qodobbada 69-70 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

in la kansal Gareeyo Jeegga Wareega ee lumay Lambarkiisu yahay B 0207283 ee Lacagtiisuna dhan tahay 50,000/= Shillin ee taariikhdiisuna tahay tan sare ku qoran, loona Cusbooneysiiyo Jaalle CALI AW XIRSI KOOSHIN, Cusbooneysiintana Gacanta laga saaro Jaallahaas Magaciisu kor ku qoran yahay ama Ciddii Awood ka haysata muddo 15 maalmood gudahood ah ka dib maalinta Go'aanka laga soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Laanta Madaxtooyada J.D.S.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa in lagu dhejiyo Nuqulka Go'aankan Bangiga Irdihiisa si Ciddii haysata Jeeggaas Wareega ee kor lagu kansal Gareeyey uga soo qortaan Cabasho haddii ay doonaan.

Hargeysa, 5.1.86

GUDDOOMIYAHA MAX. G. HARGEYSA
(Ibraahin Faarax Maxamed)

L. 36

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA
TIRSI/MGH/28/85

UJEDDO:- Digireeto Cusbooneysiin Saddex Jeeg Wareega oo Lumay Lambarkoodu kala yahay:-
1) J.W.No. 455535 ee Sh.So. 100,000/=
2) J.W.No. 203205 ee Sh.So. 50,000/=
3) J.W.No. 203206 ee Sh.So. 43,000/=
oo Dhammaantood ku qoran Cali Cabdillaahi Maxamed, kuna wada taariikheysan 2.10.85.
Guddoomiyaha Max. G. W/Galbeed ee Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Cali Cabdillaahi Maxamed, ee ku taariikheysan 14.12.85, uuna ku Codsanaayo in loo Cusbooneysiiyo Jeegaggaas Wareega ee lumay ee kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: Caddaynta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa Lambarkeedu yahay 1723 ee Taariikhdeedu tahay 17.12.85, laguna soo Caddeeyey in laga sameeyey Jeegaggaas Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa, Dhammaantood, loona sameeyey Cali Cabdillaahi Maxamed mid walbana lacagtiisu tahay tan sare ku qoran;

MARKUU ARKAY: Qodobbada 69-70 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal Gareeyo Jeegagga Wareega ee lumay lambarradooduna iyo Taariikhdooda iyo Lacagtooduba kor ku qoran yihiin loona Cusbooneysiiyo Jaallaha magaciisu yahay CALI CABDILLAAHI MAXAMED, Cusbooneysiitana Gacanta laga saaro Jaallahaas magaciisu kor ku qoran yahay ama Ciddii Awood ka haysata muddo 15 maalmood gudahood ka dib maalinta Go'aanka laga soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Laanta Madaxtooyada J. D. Soomaaliyeed.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laan-

ta Hargeysa in lagu dhejiyo Nuqulka Go'aankan Bangiga Irdihiisa si Ciddii haysata Jeegagga Wareega ee kor lagu kansal Gareeyey uga soo qortaan Cabasho haddii ay doonaan.

Hargeysa, 23.12.85

GUDDOOMIYAHA MAX. G. HARGEYSA

(Ibraahin Faarax Maxamed)

Kaalìyaha Max. G. W/G. Hargeysa
(Maxamuud Jaamac Cigaal)

L. 38

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA
TIRSI/MGH/3/86
UJEEDDO:- Digireeto Cusbooneysiin Jeegga Wareega ee Lumay Lambarkiisu yahay 208741 ee Lacagtiisuna dhan tahay 40,000/= Shiliin, kuna qoran Xalwo Giire Siciid.
Guddoomiyaha Max. G. W/Galbeed ee Hargeysa
MARKUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Xalwo Giire Siciid, ee ku taariikheysan 8.1.86, ee ay ku Codsaneyso in loo Cusbooneysiiyo Jeegga Wareega ee lumay ee sare ku qoran;
MARKUU ARKAY: Caddaynta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa, ee ay ku Caddahay in Jeegga kor ku qoran lacagtiisuna dhan tahay 40,000/= Shillin kuna qoran Xalwo Giire Siciid, lagana sameeyey Laanta Hargeysa, Taariikhdiisuna tahay 22.12.85 kuna Cad Xaashida Bangiga ee aLmbarkeedu yahay 1747 ee Taariikhdeedu tahay 23.12.85, Xaashidaas oo Bangigu Arrimahaas kor ku qoran ku soo Caddeeyey;
MARKUU ARKAY: Qodobbada 69-70 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal Gareeyo Jeegga Wareega ee lumay lambarkiisu iyo Taariikhdiis iyo Lacagtiisaba kor ku oqran yihiin, loona Cusbooneysiiyo Jaallaha Xalwo Giire Siciid, Gacantana laga saaro iyadoo muddo 15 Casho Gudahood ah ka dib maalinta Go'aanka laga soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa in lagu dhejiyo Nuqulka Go'aankan Bangiga Irdihiisa si Ciddii haysata Jeeggaas Wareega ee kor lagu kansal Gareeyey uga soo qortaan Cabasho haddii ay doonaan.

Hargeysa, 25.12.85

GUDDOOMIYAHA MAX. G. HARGEYSA
(Ibraahin Faarax Maxamed)

Kaaliyaha Max. G. W/G. Hargeysa
(Maxamuud Jaamac Cigaal)

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER BURCO

UJEEDDO:- Baafin Jeeg Wareega Lam. 0354390. (Guddoomiyaha Maxkamadda G. Togdheer)

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafinta Jeegga Wareega ee Lumay;

HADDUU ARKAY: Baafinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Burco;

HADDUU ARKAY: Qod. 69, 65) Lumid Jeegga Wareega ee kor ku xusan kuna yaalay Kayd Ismaaciil Diiriye kuna qoran lacag dhan 100,000 (Boqol kun) Sh.So. Kali ah, laguna sameeyey Berbera kana lumay Xabiibo Sahal Waheliye.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Jeegga Wareega ee kor ku xusan J/le Xabiiba Sahal Waheliye, markii ay ka soo wareegto 20 labaatan Casho laguna Sharciyeeyo Xafiiska Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA GALA CODSANAYAA

In Jeegga Cusub ee lasamayn doono gacanta laga saaro J/le Xabiibo Sahal Waheliye iyadii la sugayo muddada kor ku xusan.

B U R C O, 20.1.86

Guddoomiyaha Max. G. Tog/Burco
Dr. Abuukar Islaw Cumar

Kaaliyaha Max. G. Tog/Burco
Xaliimo X. Cabdi Aadan (Tansaaniya)
L. 40

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg W. dhumay uu lambarkiisu ahaa 0469060 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 100.000/= uu iska lahaa Maxamed Cabdlile Buuwe sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay ——— taariikhdeeduna tahay 25.1.86, ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2 ee 9.9.65

WUXUU FARARAA

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/Wareeg Lam. 0469060 ee ku qoran Maxamed Cabdulle Buuwe ayna ku jirto Sh.So. 100.000/=.

WUXUU FARARAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta 3aad u bedelo Jeegga War. ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeyso aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho 27.1.86

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shongole)

L. 41

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg W. dhumay uu lambarkiisu ahaa 0467643 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 100.000/= uu iska lahaa Cabdiraxmaan Weheliye Geedi sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay ——— Taariikhdeeduna tahay 25.1.86, ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2 ee 9.9.65

WUXUU FARARAA

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/Wareeg Lam. 0467643 ee ku qoran Cabdiraxmaan Weheliye Geedi ayna ku jirto Sh.So. 100.000/=.

WUXUU FARARAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta 3aad u bedelo Jeegga War. ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeyso aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho 27.1.86

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shongole)

L. 42

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: In Jeeg W. dhumay uu lambarkii-

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeega W. dhumay uu lambarkiisu ahaa 0467644 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 100.000/= uu iska lahaa Cabdiraxmaan Weheliye Geedi sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay —— Taariikhdeeduna tahay 25.1.86, ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2 ee 9.9.65

WUXUU FARARAA

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/Wareeg Lam. 0467644 ee ku qoran Cabdiraxmaan Weheliye Geedi ayna ku jirto Sh.So. 100.000/=.

WUXUU FARARAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta 3aad u bedelo Jeegga War. ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeyso aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho 27.1.86

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shongole)

L. 43

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg W. dhumay uu lambarkiisu ahaa 0467645 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 100.000/= uu iska lahaa Cabdiraxmaan Weheliye Geedi sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay ——— Taariikhdeeduna tahay 25.1.86 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2 ee 9.9.65

WUXUU FARARAA

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/Wareeg Lam. 0467645 ee ku qoran Cabdiraxmaan Weheliye Geedi ayna ku jirto Sh.So. 100.000/=.

WUXUU FARARAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta 3aad u bedelo Jeegga War. ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeyso aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho 27.1.86

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shongole)

L. 44

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA
TIRSI/MGH/2/86

UJ:- Dekreeto Cusbooneysiin Labada Jeeg ee Wareega ee Lumay Lambarradooduna kala yihiin: 1) 630654 ee Lacagtiisu dhan tahay 10,000/= iyo Jeegga Wareega ee Lambarkiisu yahay 119718 Lacagtiisuna dhan tahay 2.950/= ee Taariikhdooduna tahay 10.9.85 iyo kan labaad oo ay tahay Taariikhdiisu 7.11.85, kuna qoran Labada magac ee kala ah: 1) Xasan Rooble Nuur kan Labadaana ku qoran yahay Cabdi Sh. Maxamuud.

Guddoomiyaha Max. G. W/Galbeed ee Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Aadan Muuse Macaawi ee Taariikhdiisuna tahay 5.1.86 uuna ku Codsanaayo in loo Cusbooneysiiyo Labada Jeeg ee Wareega ee Dumay Lamabaradooduna kor ku qoran yihiin;

MARKUU ARKAY: Caddaynta Bangiga Kaydka ee Laanta Hargeysa ee lambarkeedu yahay 0014 ee Taariikhdeeduna tahay 6.1.86 laguna soo caddeeyey in laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa loona kala sameeyey Labada Nin ee kala ah: 1) Xasan Rooble Nuur iyo Cabdi Sh. Maxamuud, lacagtooduna dhan tahay Jeegga 1aad Sh.So. 10,000/= iyo kan 2aad oo Lacagtiisu dahn tahay 2,590/= Sh.So. Lumayna Taariikhdu markay ahayd 6.1.86;

MARKUU ARKAY: Qodobbada 69,70, ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.65ka.

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal gareeyo Jeegagga Wareega ee lumay Lambarradooduna kala yihiin b) 630654 iyo b) 119718 ee Lacagtooduna dhan tahay, ka 1aad 10,000/= Sh.So. kan 2aad 2,950/= Sh.So. Taariikhdooduna tahay tan sare ku qoran loona Cusbooneysiiyo Jaalle AADAN MUUSE MACAW Cusbooneysiintaana Gacanta laga saaro Jaallahaasi Magaciisu kor ku qoran yahay ama

Ciddii Awood ka haysata muddo 15 maalmood gudahood ah ka dib maalinta go'aanka laga soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Laanta Madaxtooyada J.D.S.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa in lagu dhejiyo Nuqulka Go'aankana Bangiga Irdihiisa si ciddii haysata Jeegaggaa Wareega ee Lumay ee kor lagu kansal gareeyey uga soo qortaan Cabasho haddii ay doonaan.

Hargeysa, 8.1.86

Guddoomiyaha Max. G. W/Galbeed Hargeysa
(Ibraahim Faarax Maxamed)

Kaaliyaha Max. G. W/Galbeed Hargeysa
(Maxamuud Jaamac Cigaal)

L. 45

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER

UJ: Baafin Jeegga War. Lam. 0234058 oo Lumay. (Guddoomiyaha Maxkamadda G. Togdheer Burco)

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafin Jeegga Wareega ee Lumay;

HADDUU ARKAY: Baafinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Burco;

HADDUU ARKAY: Qod. 69,70) Lumid Jeegga Wareega ee kor ku xusan kuna qoran yahay J/le Axmed Colujoog Nuur kuna qoran lacag dhan 100,000/= laguna sameeyey Laanta Burco;

WUXUU AMRAYAA

In loo Cusbooneysiiyo Jeegga Wareega ee kor ku xusan J/le Axmed Colujoog Nuur markii ay ka soo wa reegto 20 casho laguna Shaaciyo Xafiiska Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAAYA

In Jeegga Cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro J/le Axmed Colujoog Nuur iyadoo la sugayo muddada kor ku xusan.

B U R C O, 16.1.86

Guddoomiyaha Maxkamadda G. Togdheer Burco
(Dr. Abuukar Islaw Cumar)

Kaaliyaha Maxkamadda G. Togdheer
(Xaliimo X. Cabdi (Tanza'nia)

L. 46

MAXKAMADDA G. /WGALBEED HARGEYSA
rIRSI/MGH/5/86.

UJEEDDO:- DiDgireeto Cusbooneysiin Jeegga Wareega ee Lumay Lambarkiisu yahay 0400047 ee Taariikhdiisu tahay 6.1.86 Lacagtiisu dhan tahay 100,000/= ku qoran Biixi Xasan Abokor.

Guddoomiyaha Max. G. W/Galbeed ee Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay ISMAACIIL MAXAMED XIRSI, kuna Taariikheysan 20.1.86, uuna ku Codsanaayo in loo Cusbooneysiiyo Jeegga Wareega ee Lumay Lambarkiisu kor ku qoran yahay;

MARKUU ARKAY: Caddaynta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa, Lambarkeedu yahay 0105 ee Taariikhdeedu tahay 21.1.86, laguna soo Caddeeyey in laga sameeyey Bangiga Laanta Hargeysa Jeeggan, loona sameeyey Biixi Xasan Abokor, Lacagtiisuna dhan tahay 100,000/= Shillin, lana sameeyey Jeeggaas Taariikhdu markay ahay 6.1.86;

MARKUU ARKAY: Qodobbada 69-70 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal Gareeyo Jeegga Wareega ee Lumay Lambarkiisu yahay 0400047 ee 6.1.86 Lacagtiisuna tahay 100,000/= Shillin, Jeeggaasna Lacagtiisa uu iska leeyahay ISMAACIIL MAXAMED XIRSI, Cusboonaysiintana Gacanta laga saaro Jaallahaas Magaciisa aan soo sheegay ama ciddii Awood ka haysata muddo 15 Maalmood gudahood ah ka dib Maalinta Go'aanka laga soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Laanta Madaxtooyada J.D.S.

## WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa in lagu dhejiyo Nuqulka Go'aankan Bangiga Irdihiisa si Ciddii haysata Jeeggaas Wareega ee Lumay ee kor lagu kansal gareeyey uga soo qortaan Cabasho haddii ay doonaan.

Hargeysa, 23.1.86

Guddoomiyaha Max. G. W/Galbeed ee Hargeysa
(Ibraahin Faarax Maxamed)

Kaaliyaha Max. G. W/Galbeed Hargeysa
(Maxamuud Jaamac Cigaal)

L. 47

# Y E E R I D

## SOMALI BOTTLING COMPANY

## HARGEYSA

Waxaa Saamileyda xushmada leh la ogeysiinayaa in Shirweynaha sannadlaha ee Somali Bottilig Company lagu qaban doono xarunta Shirkadda ee Hargeysa maalinta 31ka Maarso 1986, saacadduna tahay 5ta g.d.

Hadduu shirkaasi suurtoobi waayo isu yeeridda labaad waxay ahaan doontaa maalinta 8da Abriile 1986 isla meesha iyo isla saacadda kor ku xusan.

Arrimaha laga hadli doono waa inta soo socota:
FADHI CAADI.

1. Aqbalidda miisaaniyadda 1985kii.
2. Doorashada Guddiga Maamulka.
3. Wixii kaloo la soo jeediyo.

FADHI CAADI AHAYN.

1. Kordhin raasumaal.
2. Wax ka beddelid Sharciga iyo Xeerka Shirakdda.

SOMALI BOTTLING COMPANY

Guddoomiyaha iyo Maamulaha Idman
(Maxamuud Axmed Maxamed «Wiliq»)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay uu lambarkiisu ahaa 2405 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qoran lacag dhan Sh.So. 1.218.914.43/= uu iska lahaa Cabdikariin Caanood Guuleed sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 000084 taariikh deeduna tahay 19.1.86 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee 9.9.65

WUXUU FARAYAA

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lam. 2405 ee ku qoran Cabdikariin Caanood Guuleed ayna ku jirto Sh.So. 1.218.914.43/=.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Xarunta u bedesho Buugga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 1.1.86

GARSOORAHA MGB
Dr. Cabdi Salaad Shangolle

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Codsiga dusha ku qoran;

HADDUU TIXGELIYAY: In uu dhumay Buug Kayd

Lam. 10101 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad kuna majirto lacag dhan Sh.So. 1.902.10/= kuna qoran magaca Xaawo Cali Diiriye sida ku cad warqadda Lam: —— taariikh 31.10.85, kana. soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad.

WUXUU XEERIYAY

In la qiimo tiro lana baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lam. 10101 lagana sameeyey Laanta Saddexaad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 1.902.10/=, kuna qoran magaca Xaawo Cali Diiriye.

WAXAA LA FASAXAYAA

Laanta Saddexaad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in uu siiyo Jaalle Xaawo Cali Diiriye lacagta cadadkeedu yahay 1.902.10/= ee ku qoran Buugga Kaydka ee kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood laga bilaabo maalinta lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 2.11.85

GARSOORAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax